

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Laxaad la'aanta

Hadii aad laxaad laada'ay waxaad sida sharciga waafaqsan xaq u leedahey daryeel iyo gargaar. Cudur ama dhaawac waa laga bogsan karaa. Laakiin laxaad la'aan waxa uu qofku inta badan leeyahey nolosha oo dhan. Laxaad la'aantu waxa ay inta badan timaadaa marka bay'adu munasibin qofka laxaadka la'.

Arad tirida iyo Baxnaaninta

Hadaad laxaadka laada'ay arad tirida iyo baxnaaninta maamulka gobalka Kronobergs ee carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn ayaa ku siinaaya qalab kuu fududeeya hawlahaaga.

Rugta turjumaanka waxaad ka helaysaa oo ay ku siinayaan adeeg turjumaan adigaaga dhegaha la', ama dhegaha iyo indhahaba la' ama weynaanta ku dhagabeelay ama maqalkiisu uu hooseeyo. Waxaad xaq u leedahay in aad hesho turjumaanka faraha iyo qoraalka xaaladaha maalmaha la shaqeeyo intooda badan. Adeega turjumaanku waa lacag la'aan ah waxaana laga dalban karaa iyada oo la marayo rugta turjumaannada ee maamulka gobolka.

Marka baahi degdeg ahi kuu qabato turjumaan oo la xidhiidha alaarm, wac 112. Wax dheeraad ah ka sii akhri www.ltkronoberg.se/tolkcentralen.

Talo siinta dadka buka iyada oo la adeegsanayo qoraalka telefoonka ayaa kuu diyaar ah hadaad adigu xaga maqalka ka dhaawacan tahey, dhagaha laada'ay ama aanad hadli karin. Alaarmka SOS ta ayaa qabanaya adeegaas, iyo lambarka telefoonka halkaasi waa 020-33 00 00.

Telefoonka Qoraalka waa gargaar telefoonka ah oo hadii dhibaato hadalka, codka ama luqada kaa haysato laguugu talo galey. Markaa soo wacdo xarunta xidhiidhinta telefoonka ee Maamulka Gobalka waxaad awood u heli doontaa in aad doorato telefoonka qoraalka. Wax dheeraad ah ka sii akhri www.teletal.se/

Qalabka la adeegsado

Xarunta qalabka la adeegsado ayaa haysa dhamaan qalabka ay adeegsadaan carruurta iyo dhallinyaradu ee da'doodu ay gaadhayso ilaa 18 sano. Dadka waaweyn rugtu waxay u diyaarisaa kuraasta curyaamiinta ee korontada ku socda, qalabka loo adeegsado dhaqdhaqaaqa iyo isgaadhsiinta, Qalabka loo adeegsado xannaanayta ama daweynta iyo tababarashada iyo meelo la fadhiisto oo casri ah oo dadkaas la waafajiyey.

Wax dheeraad ah ka sii akhri www.ltkronoberg.se/tolkcentralen.

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Ururada bukaan socodka- iyo dadka laxaadka la'

Waxa jira liisto ururada ah oo boga internedka ee maamulka gobalka kuna lifaaqan qaybta Caafimaadka iyo Daryeelka. Ku raadi ururada bukaan socodka iyo dadka laxaadka la' "Patient- och handikapporganisationer".

Waxa kale oo aad ka ogaan kartaa maktabada- iyo xarunta warbixinta,
Växjö 0470 58 70 70, 58 76 42,
Ljungby 0732 58 54 30.

Warbixinta la heli karo

Maamulka gobalka Kronoberg ayaa bixinaaya warbixin u gaar ah, tusaale warbixin la akhriyo, tu si fudud loo akhriyo, luqadda faraha iyo warbixin gaar ah oo luqado kala duwan lagu turjumey.

Wax dheeraad ah ka sii akhri bogayaga www.ltkronoberg.se/tolkcentralen.